89. Iska saamax waxaadna dhahdaa Nabadgalyo, way ogaandoonaan (waxa ku dhacee).

فَٱصْفَحْ عَنْهُمْ وَقُلْ سَلَٰمٌ ۚ فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ٨٩

**Eebe sarreeye Ilmo ma leh'illeen uma baahnee, waana ka fogyahay ceeb iyo Xumaan oo dhan, waana Ilaaha xaqa ah ee Cirka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, xukunkoodana isagaa iska leh ogna waqtiga qiyaamada,xagiisaana loo noqon, wax shafeeca hanta oo Eebe ka soo hadhayna ma jiro, cid xaqa raacda oo Eebe idmo mooyee. Gaaladuna waa qirsanyihiin in Eebe abuuray ee waxay u diidi isla wayni, Doqonimo iyo inay xumaanta iska dabaashaan xisaab la‘aan ee ha sugeen tan iyo abaalmarinta.**
**Sudi wuxuu yidhi: Macnuhu waxaa weeye hadduu Eebe Ilmo leeyahay Anaa u horrumeyn lahaa inuu Ilmo leeyahay, hasa yeeshee Ilmo ma leh. Az-Zukhruf (81-89).**

# Suurat Ad-Dukhaan

# سُورَةُ الدُّخَانِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waannu sheegnay iyadoo kale.

حمٓ ١

2. Waxaan ku dhaartay Kitaabka Cade (Quraanka).

وَٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُبِينِ ٢

3. Anagaa dejinay Quraanka Habeen barakeysan (Layletulqadar) anagaana wax u digi.

إِنَّآ أَنزَلْنَٰهُ فِى لَيْلَةٍ مُّبَٰرَكَةٍ ۚ إِنَّا كُنَّا مُنذِرِينَ ٣

4. Habeenkaasaana la kala bixiyaa amar kastoo xigmo leh.

فِيهَا يُفْرَقُ كُلُّ أَمْرٍ حَكِيمٍ ٤

5. Waana amar agtanada ka ahaaday, anagaana wax dirra (Rasuulo).

أَمْرًا مِّنْ عِندِنَآ ۚ إِنَّا كُنَّا مُرْسِلِينَ ٥

6. Naxariis ka ahaatey xagga Eebahaa, Eebaana wax maqle ah wax og.

رَحْمَةً مِّن رَّبِّكَ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ٦

7. Waana Eebaha samooyiinka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya haddaad yaqiinsanaysaan.

رَبِّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَآ ۖ
إِن كُنتُم مُّوقِنِينَ ٧

8. Ilaahay mooyee Eebe kalana ma jiro, isagaa wax nooleeya waxna dila,

لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ يُحْىِۦ وَيُمِيتُ ۖ رَبُّكُمْ

waana Eebihiina iyo Eebaha Aabbayaalkiinii horreeyey.

وَرَبُّ ءَابَآئِكُمُ ٱلْأَوَّلِينَ ۝٨

Eebe sarreeye wuxuu ku dhaartay inuu soo dajiyay Kitaabka Quraanka ah Habeen barakeysan oo wax kasto lakalo bixiyo, waana habeenka laylatulqaddarka ee bisha Soon ku jirta ee Quraanka la soodajiyey siday aayado kale cadeeyeen, saasaana sugan cidda tidhi waa Shan iyo Tobanka bisha Shacbaan wax xujo ah oo cad ma hayso.
Eebana waa naxariiste, Maqle, oge oo xukunka caalamka iska leh, wax nooleeya waxna dila'waana Eebaha Khalqiga dhamaan hor iyo dibba, ee waa in laga yaabo Eebe si dhab ah. Ad-Dukhaan (1-8).

---

9. Waxayse ku suganyihiin shaki wayna ciyaari.

بَلْ هُمْ فِى شَكٍّ يَلْعَبُونَ ۝٩

10. Ee sug Maalinta uu ku imaan Cirku qiiq muuqda (isagoo ku dheehan).

فَٱرْتَقِبْ يَوْمَ تَأْتِى ٱلسَّمَآءُ بِدُخَانٍ مُّبِينٍ ۝١٠

11. Oo dabooli Dadka kaasina waa cadaab daran.

يَغْشَى ٱلنَّاسَ ۖ هَٰذَا عَذَابٌ أَلِيمٌ ۝١١

12. Waxayna dheheen Eebow naga fayd cadaabka waxaan nahay Mu'miniine.

رَّبَّنَا ٱكْشِفْ عَنَّا ٱلْعَذَابَ إِنَّا مُؤْمِنُونَ ۝١٢

13. Goormey waantoobi isagoos u yimid Rasuul cad «muuqda».

أَنَّىٰ لَهُمُ ٱلذِّكْرَىٰ وَقَدْ جَآءَهُمْ رَسُولٌ مُّبِينٌ ۝١٣

14. Markaasay ka, jeedsadeen Nabiga waxayna dheheen waa waxlabare waalan.

ثُمَّ تَوَلَّوْا۟ عَنْهُ وَقَالُوا۟ مُعَلَّمٌ مَّجْنُونٌ ۝١٤

15. Anagu waxaan idiinka faydaynaa cadaabka wax yar idinkuna waxaad ku noqonaysaan xumaanta.

إِنَّا كَاشِفُوا۟ ٱلْعَذَابِ قَلِيلًا ۚ إِنَّكُمْ عَآئِدُونَ ۝١٥

16. Maalintaan qabanayno qabashada wayn (Qiyaamada) (ama Badar) waanu aarsan.

يَوْمَ نَبْطِشُ ٱلْبَطْشَةَ ٱلْكُبْرَىٰٓ إِنَّا مُنتَقِمُونَ ۝١٦

Nabigu wuxuu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebihiin wuxuu idiinka digay Saddex: Qiiq u qabta Mu'minka sida hargab Gaalkana qabta intuu meel walba ka baxo, iyo Daabad iyo Dajaal, waxaa wariyey Ibnu Jariir iyo Dhabraani. Madax adayg iyo Gaalimana wax ma taraan illeen Eebaa ka aarsan gaalo iyo xaq diidayaasha ku tilmaami Nabigu inuu waalanyahay'kuwaasi wax yar ha sugeen. Ad-Dukhaan (9-16).

---

17. Dhab ahaanbaan Imtixaanay hortood qoomkii Fircoon, waxaana u yimid Rasuul sharaf leh.

۞ وَلَقَدْ فَتَنَّا قَبْلَهُمْ قَوْمَ فِرْعَوْنَ وَجَآءَهُمْ رَسُولٌ كَرِيمٌ ۝١٧

18. Isagoo dhihi iidhiiba addoomada Eebe (ama maqalka) waxaan idiin ahay Rasuul aamin ah.

أَنْ أَدُّوٓا۟ إِلَىَّ عِبَادَ ٱللَّهِ ۖ إِنِّى لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ١٨

19. Hana iska wayneynina Eebe waxaan idiin la imid xujo cade.

وَأَن لَّا تَعْلُوا۟ عَلَى ٱللَّهِ ۖ إِنِّىٓ ءَاتِيكُم بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ١٩

20. Waxaana ka magangalay Eebahay iyo Eebihiin inaad idhagaxyeysaan.

وَإِنِّى عُذْتُ بِرَبِّى وَرَبِّكُمْ أَن تَرْجُمُونِ ٢٠

21. Ee hadaydaan i rumeyn iga fogaada (idaaya).

وَإِن لَّمْ تُؤْمِنُوا۟ لِى فَٱعْتَزِلُونِ ٢١

22. wuxuuna u qaylyey Eebihiis in kuwaasu yihiin Qoom dambiila yaal ah.

فَدَعَا رَبَّهُۥٓ أَنَّ هَٰٓؤُلَآءِ قَوْمٌ مُّجْرِمُونَ ٢٢

23. guuri addoomadayda Habeenimo, waa laydin raaciye.

فَأَسْرِ بِعِبَادِى لَيْلًا إِنَّكُم مُّتَّبَعُونَ ٢٣

24. kana tag badda iyadoo xasilloon oo furan iyagu waa col la maanshayne.

وَٱتْرُكِ ٱلْبَحْرَ رَهْوًا ۖ إِنَّهُمْ جُندٌ مُّغْرَقُونَ ٢٤

waxbadan yuu Quraanku ka warramay Fircoon iyo Qoomkiisii iyo Nabi Muuse,iyo wixii isku qabsaday, waxay ku dambaysay oo ah xaqii oo kor maray, iyo Gaaladii oo la halaagay, waxaase loo baahanyahay uun in lagu waano qaato, lagana leexdo Jidka Gaalada. Ad-Dukhaan (17-24).

---

25. imisey ka tageen Beero iyo Ilo.

كَمْ تَرَكُوا۟ مِن جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ٢٥

26. iyo Tallaal iyo meel sharaf leh.

وَزُرُوعٍ وَمَقَامٍ كَرِيمٍ ٢٦

27. iyo Nicmooyin ay ku raaxaysanayeen.

وَنَعْمَةٍ كَانُوا۟ فِيهَا فَٰكِهِينَ ٢٧

28. xaalkuna waa saas, waxaana dhaxalsiinay qoom kale.

كَذَٰلِكَ ۖ وَأَوْرَثْنَٰهَا قَوْمًا ءَاخَرِينَ ٢٨

29. uma ooyin samada iyo Dhulku korkooda, lamana sugin.

فَمَا بَكَتْ عَلَيْهِمُ ٱلسَّمَآءُ وَٱلْأَرْضُ
وَمَا كَانُوا۟ مُنظَرِينَ ٢٩

30. waana ka korinay ree Bani Israa‘iil cadaab wax dulleeya.

وَلَقَدْ نَجَّيْنَا بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ مِنَ ٱلْعَذَابِ ٱلْمُهِينِ ٣٠

31. (Fircoombaan ka korinay) wuxuuna ahaa isla weyne xadgudbayaasha ka mid ah.

مِن فِرْعَوْنَ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ عَالِيًا مِّنَ ٱلْمُسْرِفِينَ ٣١

32. waxaana ka dooranay (dadkii waqtigoodii) anagoo og.

وَلَقَدِ ٱخْتَرْنَٰهُمْ عَلَىٰ عِلْمٍ عَلَى ٱلْعَٰلَمِينَ ٣٢

33. waxaana siinay aayado imtixaan cad kusuganyahay.

وَءَاتَيْنَٰهُم مِّنَ ٱلْءَايَٰتِ مَا فِيهِ بَلَٰٓؤٌا۟ مُّبِينٌ ﴿٣٣﴾

raaxo aduunyo iyo ku Nicmeysigeedu wax matarto haday ciqaab iyo halaag ka dambeyni, taasoo ah Nicmadoo laga wareejiyo iyo Cidhib xun sidii fircoon iyo qoomkiisii lagu falay Cir iyo Dhul midna ma xusuusan umana ooyin, Nicmadana waxaa lagu dhawraa mahad Eebe iyo toosnaan.
Mujaahid iyo Sufyaan waxaa laga wariyay in Cirka iyo Dhulku u ooyi Mu‘minka Afartan Maalmood (markuu dhinto). Ad-Dukhaan (25-33).

---

34. kuwaasi (Gaaladu) waxay dhihi.

إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ لَيَقُولُونَ ﴿٣٤﴾

35. arrintu ma aha geerida hore mooyee, mana nihin kuwo la soobixin.

إِنْ هِىَ إِلَّا مَوْتَتُنَا ٱلْأُولَىٰ وَمَا نَحْنُ بِمُنشَرِينَ ﴿٣٥﴾

36. noo keena aabayowgano haddaad run sheegaysaan.

فَأْتُوا۟ بِـَٔابَآئِنَآ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٣٦﴾

37. miyagaa khayr roon mise qoomkii Tubac iyo kuwii ka horreeyey waan halaagnay waxayna ahaayeen dambiilayaal.

أَهُمْ خَيْرٌ أَمْ قَوْمُ تُبَّعٍ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ أَهْلَكْنَٰهُمْ ۖ
إِنَّهُمْ كَانُوا۟ مُجْرِمِينَ ﴿٣٧﴾

38. Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya umaanaan abuurin ciyaar.

وَمَا خَلَقْنَا ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ
وَمَا بَيْنَهُمَا لَٰعِبِينَ ﴿٣٨﴾

39. mana aanaan u abuurin wax aan xaq ahayn hasa yeeshee badankood ma oga.

مَا خَلَقْنَٰهُمَآ إِلَّا بِٱلْحَقِّ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٩﴾

40. maalinta kala bixinta yaa ballan u ah dhamaan.

إِنَّ يَوْمَ ٱلْفَصْلِ مِيقَٰتُهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٤٠﴾

41. waana Maalintaan Qaraabanimo waxba laysugu tarayn laysuna gargaarayn.

يَوْمَ لَا يُغْنِى مَوْلًى عَن مَّوْلًى شَيْـًٔا وَلَا هُمْ
يُنصَرُونَ ﴿٤١﴾

42. cid Eebe u naxariisto mooyee, illeen waa adkaade naxariistee.

إِلَّا مَن رَّحِمَ ٱللَّهُ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٤٢﴾

cid diida oo isla wayn iyo cid kalaba Eebe wuu dili wuuna soo nooleyn’dhabtuna waa saas, Eebana wuxuu u abuuray Cirka iyo dhulka iyo waxa udhaxeeyaba Xaq iyo in lays abaal mariyo, arrintana Maalintaas Eebaa iska leh’wax isu gargaari ama wax isu tarina ma jiro’cid Eebe u naxariisto mooyee.
waana arin ay waajibtahay in aad loo eego looguna darbado. Ad-Dukhaan (34-42).

---

43. Geedka Zaquumka ah.

إِنَّ شَجَرَتَ ٱلزَّقُّومِ ﴿٤٣﴾

44. waa cunnada dambi badanaha.

طَعَامُ ٱلْأَثِيمِ ﴿٤٤﴾

كَٱلْمُهْلِ يَغْلِي فِي ٱلْبُطُونِ ٤٥

45. waana Laami oo kale kuna kari Caloosha.

كَغَلْيِ ٱلْحَمِيمِ ٤٦

46. sida Xamiimka (Kulayl daran) oo kale.

خُذُوهُ فَٱعْتِلُوهُ إِلَىٰ سَوَآءِ ٱلْجَحِيمِ ٤٧

47. (waxaana lagu dhihi) qabta Gaalka una Jiida Jaxiimo dhexdeeda.

ثُمَّ صُبُّوا۟ فَوْقَ رَأْسِهِۦ مِنْ عَذَابِ ٱلْحَمِيمِ ٤٨

48. markaas ku shuba Madaxiisa korkiisa cadaab kulul.

ذُقْ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْكَرِيمُ ٤٩

49. (waxaana lagu dhihi) dhadhami (Cadaabka ) waxaad tahay adkaade sharaflehe.

إِنَّ هَٰذَا مَا كُنتُم بِهِۦ تَمْتَرُونَ ٥٠

50. kaasina waa kaad ahaydeen kuwo shakiya (Cadaabka).

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِي مَقَامٍ أَمِينٍ ٥١

51. kuwa dhawrsadana waxay kusugnaan meel aamin ah.

فِي جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ٥٢

52. Jannooyin iyo Ilo (yey kusugnaan).

يَلْبَسُونَ مِن سُندُسٍ وَإِسْتَبْرَقٍ مُّتَقَٰبِلِينَ ٥٣

53. waxayna xidhan Xariir jilicsan iyo mid adag (oo dhalaali) wayna is qaabili.

كَذَٰلِكَ وَزَوَّجْنَٰهُم بِحُورٍ عِينٍ ٥٤

54. saasoo kale waxaa usugnaaday Haween Indho waaweyn.

يَدْعُونَ فِيهَا بِكُلِّ فَٰكِهَةٍ ءَامِنِينَ ٥٥

55. waxayna uyeedhan Janada dhexdeeda Khudaar kasta iyagoo aamin ah.

لَا يَذُوقُونَ فِيهَا ٱلْمَوْتَ إِلَّا ٱلْمَوْتَةَ
ٱلْأُولَىٰ ۖ وَوَقَىٰهُمْ عَذَابَ ٱلْجَحِيمِ ٥٦

56. mana ku dhadhamiyaan Jannada dhexdeeda Geeri, Geeridii hore mooye wuxuuna ka dhawray (Eebe) Cadaabka Jaxiimo.

فَضْلًا مِّن رَّبِّكَ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ٥٧

57. waana fadliga Eebahaa, taasina waa liibaanta wayn.

فَإِنَّمَا يَسَّرْنَٰهُ بِلِسَانِكَ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ٥٨

58. waxaan ugu fududaynay Quraanka Carrabkaaga inay waantoobaan.

فَٱرْتَقِبْ إِنَّهُم مُّرْتَقِبُونَ ٥٩

59. ee sug iyaguna way sugiye.

Rasuulku wuxuu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisaEebe ha yeelee) Waxaa lagu odhan Ehelu Jannaha waxaa idiin sugnaaday inaad caafimaadsanaataan oydaan Bukoonin waligiin, iyo inaad Noolaataan oydaan dhimanin waligiin, iyo inaad Nicmeysataan oydaan rafaadin waligiin, iyo inaad Da‘yaraataan oydaan gaboobin waligiin. Waxaa wariyay Muslim.
Dhabtuna waa inay arrintaasu tahay Liibaanta wayn ee Gaalo ha sugto dulli iyo Ciqaab’Mu‘miniintuna sharaf iyo wanaag. Ad-Dukhaan (43-59).